## SUURAT AL-FAJR:

***Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.***

***1. Eebe wuxuu ku dhaartay waabariga***

***2. Iyo Habeennada Tobanka ah ( Arrafo )***

***3. Iyo tirada siman iyo tan is dheer***

***4. Iyo habeenku markuu tagayo***

***5. Miyayna arrintaasu ahayn wax loogu dhaarto qof caqli leh***

***6. Ma ku soo gaadhay sida Eebahaa ku falay Caad***

***7. Ee ahaa Irama xooggana lahaa***

***8. Wax la mid ahna aan lugu abuurin dhulka***

***9. Iyo Thamuudkii ahaa dhagaxa kuwa ku jarjara waadiga***

***10. Iyo Fircoonkii dhakawyada lahaa***

***11. Kuwiina ahaa ku xadgudbay dhulka***

***12. Kuna badiyay dhexdiisa fasaadka***

***13. Markaasaana Eebe ku shubay caddibaad daran***

***14. Maxaayeelay Eebe waa u darbanyahay ( abaalmarinta )***

***Sharaxda Suurrada ( 1 )***

Eebe wuxuu abaal-mariyay halaagayna kuwii xaq-diidayaasha ahaa Nabiyadana beeniyay, isna biday xoog iyo tabar, ruux kastoo is kibriyana oo xumaan iyo fasaad dhulka ku sameeyana wuxuu la kulmi waxay la kulmeen, wuxuuna ka cabbi weelkay ka cabbeen, taasina waa sunnada Eebe wax baddalina ma jiro.

*15. Marka Eebe dadka imtixaano xoolana ugu nicmeeyo wuxuu dhihi ( kan xun ) waa la i sharrifay ( isagoo faani )*

*16. Haddiise Eebe imtixaano oo xoolaha ku yareeyo wuxuu dhihi Eebaa i dulleeyay*

*17. Saas ma aha ee waxaydaan dhaqaalaynayn agoonka*

*18. Mana fartaan in masaakiinta wax la siiyo*

*19. Waxaadna aad u cuntaan dhaxal xaq darro*

*20. Xoolahana waxaad u jeceshihiin si daran*

*21. Saas ma aha ee marka dhulka la burburiyo*

*22. Eebe iyo Malaguna la yimaaddo amarkiisa Malaa'igtoo safan*

*23. Naarta Jahannamana Maalintaas la keeno, dadku waxay xusuusan*

*waxay faleen, maxayse xusuusi tari*

*24. Waxay dhihi shallaytee maan wanaag hormarsado*

*25. Maalintaas sida Eebe wax ruux u cadaabi ma jiro*

*26. Wax sida Eebe wax u xidhina ma jiro*

*27. Naftase xaqa rumaysay ee xasillooneey*

*28. U noqo Eebahaa adoo raalli ah lagana raalli noqday*

*29. Dhexgalna addoomadayda ( wanaagsan )*

*30. Galna Jannadayda*

Qur'an 89:1-30

***Sharaxda Suurrada ( 2 )***
Xoola badnida iyo saboolnimaduba waa imtixaan Eebe, mana aha jacayl Eebe

iyo nebcaansho midna, saas daraaddeed waa in wax bixinta lays faro, lana dhaqaaleeyo agoonta iyo masaakiinta, booli cuniddana layska jiro.
Nabiguna wuxuu yidhi “ Naxariis iyo Nabadgalyo Korkiisa Eebe ha yeelee”:
Guriga ugu khayr badan muslimiinta waa guriga agoon loogu sama falo.
Guriga ugu shar badan muslimiintana waa guri agoon lagu xumeeyo.

Waxaa laga wariyay Cabdullaahi Ibnu Mubaarak

Saa daraadeed waa in wanaag la hor marsadaa si raalli aha-anshaha Eebe iyo Jannadiisa loo helo iyo naf xasilloon, illeen Qiyaame iyo xisaabba dambaysee.